# JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

# WASAARADDA DASTUURKA IYO ARRIMAHA FEDERAALKA

## Hindise Sharci loo adeegsanayo diyaarinta qoraalka Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya

**Sharci Lam.______________ Taariikh______________________**

**Novembar 2009**

# TUSMO

## Qaybta Koowaad

## Gogoldhig


- **Qodobka 1-aad:** *Magaca Sharciga*
- **Qodobka 2-aad:** *Ulajeeddada Sharciga*
- **Qodobka 3-aad:** *Qeexidda Ereyada*


## Qaybta Labaad

## Mabaadii'da Guud: Geeddisicodka iyo Nuxurka Dastuurka


- **Qodobka 4-aad:** *Mabaadii'da u gundhigga ah diyaarinta qoraaalka dastuurka*
- **Qodobka 5-aad:** *Himilooyinka iyo Ujeeddooyinka Dastuurka*


## Qaybta Saddaxaad

## Xilalka hay'adaha u xilsaaran Diyaarinta Qabyaqoraalka Dastuurka


- **Qodobka 6-aad:** *Madaxweynaha*
- **Qodobka 7-aad:** *Xukuumada Federaaliga ku-meel-gaarka*
- **Qodobka 8-aad:** *Baarlamaanka Federaaliga ku-meel-gaarka*
- **Qodobka 9-aad:** *Xilka iyo waajibaadka Guddiga Madaxbannaan ee Dastuurka Federaaliga (GMDF)*
- **Qodobka 10-aad:** *Xubinimada Guddida Madaxbannaan ee Dastuurka Federaaliga*
- **Qodobka 11-aad:** *Shuruudaha xubinnnimada Guddiga*
- **Qodobka 12-aad:** *Muddada xilka iyo xubinnimada Guddiga Dastuurka*
- **Qodobka 13-aad:** *Xilwaayidda Xubnaha Guddiga*
- **Qodobka 14aad:** *Agaasinka Guud Guddiga Dastuurka*
- **Qodobka 15-aad:** *Awoodaha Guddida Dastuurka*
- **Qodobka 16-aad:** *Guddi hoosaadyada Guddiga Dastuurka*
- **Qodobka 17-aad:** *Dhaarta Xafiiska*
- **Qodobka 18-aad:** *Guddiga Wacyigelinta*
- **Qodobka 19-aad:** *Shuruudaha iyo Magcaabista Guddiga Wacyigelinta*
- **Qodobka 20-aad:** *Xeerka Dhaqan Wanaagga Shaqo*
- **Qodobka 21-aad:** *Maaliyadda iyo imkaaniyaadka kale ee Guddida Dastuurka iyo Guddiga Wacyigelinta*
- **Qodobka 22-aad:** *Mushaarooyinka iyo Gunnoyinka Guddida dastuurka, Agaasinka Guud iyo Guddiga Wacyigelinta*
- **Qodobka 23-aad:** *Guddiga Marjiciga Hawlaha Dastuurka*

**QAYBTA AFARAAD**
**Diyaarinta Qoraalka Dastuurka iyo Talo-Gelinta ee Dadaeynaha**

- **Qodobka 24-aad:** *Adeegga Wacyigelinta*
- **Qodobka 25-aad:** *Qorshaha Hawlgalka*
- **Qodobka 26-aad:** *La-tashiga Dadweynaha*
- **Qodobka 27-aad:** *Diyaarinta iyo faafinta Soojeedinta Qabyoqoraalka Dastuurka*
- **Qodobka 28-aad:** *Qabyoqoraalka Soojeedinta ah lagala tashanaayo dadweynaha*
- **Qodobka 29-aad:** *Diyaarinta iyo faafinta Qayoqoraalka Dastuurka*
- **Qodobka 30-aad:** *Nidaamka go'aanqaadashada Guddiga*
- **Qodobka 31-aad:** *Muddeynta Soo afjaridda Geeddisocodka*
- **Qodobka 32-aad:** *Toosin Sharci Lambar TEP/1/193/06* ee *10-ka Juun 2006*

**JEDWALADA**

- **Jedwelka 1-aad:** *Muddeynta Geeddisocodka*
- **Jedwalka 2-aad:** *Dhaarta xubnaha Guddiga Dastuurka, Xogahaya Guud iyo Ku-xigeennada Xogahaya Guud*
- **Jedwalka 3-aad:** *Xeerka Hannaanwanaagga xubnaha Guddiga Dastuurka iyo Shaqaalaha Guddiga*

# Hindise Sharci loo adeegsanayo diyaarinta qoraalka Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya

## Qaybta Koowaad

## Gogoldhig

### Qodobka 1-aad

*Magaca Sharciga*

Sharcigan waxaa loogu magacdaray Sharciga loo adeegsanayo diyaarinta Qabyoqoraalka Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya ee 2009/2010.

### Qodobka 2-aad

*Ulajeeddada Sharciga*

Sharcigan wuxuu wax ka beddelaya qodobbo ka mid ah sharciga lambarkiisu yahay TFP/1/193/06 ee lagu dhisay Guddiga Madaxbannaan ee Dastuurka Federaalka sida Qodobka 1aad faqradiisa 1aad (tirade xubnaha 15+15= 30 xubnood) Qodobka 2aad faqradiisa 1aad, qodobka 3aad xarafkiisa T, Qodobka 7aad faqradiisa 1aad iyo 2aad, waxaana looga gol leeyahay in lays waafajiyo hannanka diyaarinta Qabyoqoraalka Dastuurka iyo isbeddelka uu keenay heshiiskii Djibuoti iyo isbedelka guud ee duruufaha dalka.

### Qodobka 3-aad

*Qeexidda Ereyada*

"**Guddiga wacygelinta**" Waxaa looga jeedaa guddiga ku wacyigelinta bulshada Qabyoqoraalka Dastuurka iyo heerka uu marayo mar walba ee lagu dhisay Qodobka 18aad ee sharcigan;

**Axdi**" macnahiisu waa Axdiga ku Meel Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya;

"**Wacyigelinta bulshada**" macnaheedu waa wacyigelinta la xiriirta arrimaha khuseeya dastuur sameynta, sida: dastuurada; qaabka, shaqada iyo habka ay u nidaamsan yihiin dawladaha casriga ahi; taariikhda dawladnimada Soomaaliyeed; iyo xuquuqda asaasiga iyo waajibaadka muwaadaniinta iyo beelaha;

"**Guddiga**" macnihiisu waa Guddida Madaxa Bannaan ee Dastuurka Federaaliga ah ee lagu dhisay Qoddobka 9aad ee sharcigan, oo waafaqsan sharciga lam. Yahay TFP/1/193/06 iyo Heshiiska Djibouti;

**"Xubin Guddi"** macnaheedu waa xubin ka tirsan Guddida Madaxa Bannaan ee Dastuurka iyo Arrimaha Federaaliga ah;

“**Dastuur**” macnihiisu waa dastuurka ka dhalan doona Qabyaqoraalka Dastuurka Qaqranka Soomaaliyeed ee loo adeegasanaayo xeerkan;
**“Qurbajoogta”** macnaheedu waa Soomaalida ku nool meel ka baxsan Jamhuuriyadda;

“**Qoraalka Dastuurka”** macnahiisu waa qoraalka kama danbeysta ah ee dastuurka ee diyaarintiisa loo adeegsaday Xeerkan;

“**Dawladda**” macnaheedu waa Dawladda ku Meel Gaarka ah ee Federaalka ah ee lagu dhisay Axdiga’;

**“Hay’adaha Diyaarinta qoraalka dastuurka”** waxaa ka mid ah Baarlamaanka Federaalka ah ee ku meel gaarka ah, Guddida Baarlamaanka ee Dastuurka, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, Ra’iisal Wasaaraha Xukuumadda, Golaha Wasiirada, Wasiirka Dastuurka iyo Arrimaha Federaaliga, Kulamada La-tashiga dadweynaha, *(Forum)* ee Dastuurka, Xubnaha iyo shaqaalaha Guddida Madaxa Bannaan ee Dastuurka Fedraalka, iyo Guddiga Wacyigelinta Dadweynaha;

**“Wasiirka”** macnahiisu waa Wasiirka Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka ah;

“**Baarlamaanka”** macnahiisu wuxuu noqonayaa Baarlamaanka Federaalka eek u meel Gaarka ah;

**Madaxweyne:** Waxaa looga jeedaa Madaxweynaha Jumhuuriyadda;

“**Hannaan/Geedi-socod”** macnaheedu waa geedi-socodka lagu diyaarinayo qoraalka dastuurka;

“**Qoraalka Talo-Gelinta Dastuurka”** macnahiisu waa qoraalka ay soo gudbiyaan Guddida Dastuurku si dadweynuhu u qiimeeyo ra’yina uga dhiibto;

**“Jamhuuriyadda”** macnaheedu waa Jamhuuriyadda Soomaaliya;

**“Agaasinka Guud”** macnaheedu waa Agaasinka Guud ee Guddiga Dastuurka;

**“Agaasimaha Guud iyo Ku-Xigeenada Agaasimaha Guud**” macnahoodu waa dadka kala haya xilal maamuleedka Xafiiska Guddiga;

**“Muddeynta hawlaha”** macnaheedu waa jedwelka u dhigan dhammeystirka qoraalka dastuurka ee lagu cayimay Jedwelka 1-aad;

# Qaybta Labaad
# Mabaadii'da Guud: Geeddisicodka iyo Nuxurka Dastuurka

## Qodobka 4-aad

*Mabaadii'da u gundhigga ah diyaarinta qoraaalka dastuurka*

1. Hay'adaha u xilsaaran diyaarinta Dastuurka waa in ay hubiyaan in geeddi-socodku uu noqdo mid, intii suuragal ah laga wada qayb-qaato, waana in dadka, iyadoo aan la kala gudbin lana carqaladayn, la siiyaa xogta la xiriirta ujeedooyinka iyo heerka uu marayo geeddi-socodku, waana in la siiyaa fursado macna leh oo ay ugu soo bandhigaan Guddiga Dastuurka aragtiyahooda iyo talooyinkooda, isla markaana ay ra'yigooda la xiriira Qoraalka Talo-Gelinta ee Dastuurka. Hay'adaha u xilsaaran diyaarinta Qabyoqoraalka Dastuurka waa inay xaqiijinayaan in geeddisocodka noqdo mid hadba intii suurtogal ah, si siman looga wadaqaybgalo, oo wax takoor ah ama hagar midna ku jirin, dadweynahana lagu wargeliyo ujeeddooyinka iyo heerarka geddisocodka iyo in fursado ballaaran oo wax ku ool ahna loo siiyo dhiibashada fiirooyinkooda iyo ra'yigooda iyo talooyinka ay Guddiga u dhiibanayaan iyo ka faaloodka iyo ka baaraandegidda bdegidda Qayaqoraalka Dastuurka uu Guddiga soo jeediyo

2. Hay'adaha u xilsaaran diyaarinta Dastuurka waa in ay sameeyaan dadaal gaar ah si loo sugo ka qaybqaadashada muwaadiniinta laxaadka la', dumarka, dadka aan wax qorin waxna akhriyin, kuwa ku nool meelaha fog-fog, iyo kuwa ku nool qurbaha.

3. Hay'adaha u xilsaaran diyaarinta dastuurka waxaa la xisaabtamaya Xukuumadda

## Qodobka 5-aad

*Himilooyinka iyo Ujeeddooyinka Dastuurka*

1. Xeerkan ayaa qeexaya nidaamka qabanqaabada loogu howlgalaayo diyaarinta qoraalka Dastuurka Jumhuuriyadda.

2. Ujeedada Dastuurku, isagoo mar walba waafaqsan mabaadii'da Sahreecada Islaamka iyo ujeedooyinka lagu cabbiray Axdiga, waa:
   a) Aas'aasidda Dawlad Caadil ah, Federaal ah, ku dhaqanta Shareecada Islaamka, kuna slaysan kala sooca awoodaha, dawlad-wanaag, Dastuur-raacid iyo Hoggaanka Sharciga;

   b) In la soo afjaro khilaafka daba dheeraaday iyo dagaalada ka jira Jamhuuriyadda iyadoo la dhigayo asaaskii mujtamac ku dhaqma Caddaladda;

   c) Dhisidda nabad waarta, la ilaaliyo midnimada qaranka iyo u hawlgelidda hormarinta dadka;
   d) In la ilaaliyo xuquuqda aadamaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee Illaaheey siiyey qof walba, isla markaana lagu cabbiray sharciyada xuquuqda insaanka ah ee caalamiga ah, iyadoo aan cidna lagu takoorin jinsi, midab, (labood iyo dheddig), luqad, diin, siyaasad ama Fikir iyo asal kale, amabase maqaam kale;

e) Wax ka qabashada baahiyaha aasaasiga ah ee Muwaaddinka Soomaaliyeed;

f) Habsami u qaybinta khayraadka dalka, isla markaana si gudboon loogu horuumariyo unugyada federaalka ah ee Jamhuuriyadda;

g) Ilaalinta, dhirririgelinta qiyamka Islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed;

h) Taageeridda nabadda dariswanaagga iyo iskaashiga goboleed iyo kan caalamiga ah;

## Qaybta Saddaxaad

## Xilalka hay'adaha u xilsaaran Diyaarinta Qabyaqoraalka Dastuurka

### Qodobka 6-aad

*Madaxweynaha*

Madaxweynaha wuxuu Xeer Madaxweyne ku magacaabaya:

Xubnaha Guddiga Dastuurka ee ay Golaha Wasiiradu soo gudbiyeen ka dibna Baarlamaanku ansixiyey si waafaqsan qodobka 68-aad ee Cahdi KMG iyo Qodobka 10-aad ee sharcigan si waafaqsan heshiiskii Djibouti.

### Qodobka 7-aad

*Xukuumada Federaaliga ku-meel-gaarka*

1. Xukuumadda waxay :

a) Baarlamaanka u gudbineysaa soojeedinta magacaabidda xubnaha (la xiriira) Guddiga Dastuurka si waafaqsan Qoddobka 68aad ee Cahdiga KMG iyo Qodobka10aad ee sharcigan;

b) Hubineysaa in Guddiga Dastuurku uu ku socdo jedwelkii loogu tala galay diyaarinta Qoraalka Dastuurka isla markaana aanay ka dib dhicin waqtiyada kama danbeysta ah ee hawl walba loo cayimay;

c) Waxay xiriirineysaa hawlaha Guddiyada Dastuurka, Guddida Xuduudaha, Guddida Tirakoobka iyo Guddida Dib-u-Heshiisiinta iyo Doorashooyinka.

d) Waxay Saddexdii biloodba mar ka qaadanaysa Guddiga Dastuurka warbixin ku saabsan horumarka ay Guddigu ku sameeyey hawlahii ay u xilsaarnayd

2. Wasiirka Dastuurka iyo Arrimaha Federaalku wuxuu si gaar ah ugu xilsaaran yahay in uu ka taageero Dawladda sidii ay ula xiriiri lahayd Guddida Dastuurka Madaxa ee Bannaan iyo sidii loo oofin lahaa xilalka Dawladda ee la xiriira diyaarinta Qoraalka Dastuurka ee kama danbeysta ah.

3. Ra'iisal Wasaaraha ayaa magcaabaya xubnaha Guddiga Wacyielinta isagoo tixgelinaaya talooyinka Wasiirka Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka.

## Qodobka 8-aad

*Baarlamaanka Federaaliga ku-meel-gaarka*

1. Baarlamaanka wuxuu:

(a) Ansixinayaa Guddida Madaxbannaan ee Dastuurka ee uu soo jeediyo Golaha Wasiiradu;
(b) Wuxuu ku taageeraa Guddiga Dastuurka dhamaystirka qoraalka dastuurka waqtigii loogu talagalay sida ku cad jedwalka

2. Baarlamaanka waxaa ugu wakiil ah arrimaha Dastuurka Guddigiisa Guuddigiisa Arrimaha Dastuurka si uu uga kaaliya gudashada xilka kaga began diyaarinta Dastuurka.

## Qodobka 9-aad

*Xilka iyo waajibaadka Guddiga Madaxbannaan ee Dastuurka Federaaliga (GMDF)*

1. Qodobkan waxaa lagu dhisay Guddida Madaxbannaan ee Dastuurka Federaaliga (GMDF) si waafaqsan sharci lam. 1/193/06 iyo Heshiiska Djibouti.

2. Xilalka Guddigu wuxuu waajibaadkiisa ku gudanaya sida ku qeexan Qodobka 11aad iyo Qodobka 68aad ee Cahdiga KMG

3. Xilka iyo waajibaadka Guddiga:
Guddiga wuxuu u xilsaaran yahay

   (a) Inuu dadweynaha Soomaaliya kala tashado arrimaha Dastuurka;

   (b) Diyaariyo Qoraalka Dastuur kama danbeysta ah;

   (c) Guddiga Dastuurka wuxuu diyaarinaya warbixin saddaxdii biloodba mar wuxuuna u gudbinaya Wasaaradda Dastuurka;

   (d) Diyaarin Qorshe-howleed gooreysan oo ay la socoto miisaaniyad tifaftiran oo ay diyaarisay Wasaaradda muddo aan ka badnayn saddax toddobaad ka dib kulanka koowaad ee guddiga Dastuurka;

   (e) Diyaarinta iyo faafinta warbixin ku qoran luqad si fudud loo fahmi karo, oo lagu fasirayo sababaha, iyo doodaha ka dambeeya ama ay kasoo jeedaan qodobbada ay xanbaarsan yahay Qoraalka Talo Gelinta iyo kan kama Danbeysta ah ee Dastuurka;

## Qodobka 10-aad

*Xubinimada Guddida Madaxbannaan ee Dastuurka Federaaliga*

1. Guddida Dastuurku waxay ka kooban tahay 30 xubnood, si waafaqsan Heshiiska Djibouti;

2. Guddida Dastuurku waxay yeelaneysaa Gudoomiye, Guddoomiye-ku-xigeenka koowaad iyo Guddoomiye-ku-xigeenka labaad.

3. Guddoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen dib ayaa loo dooranaya, waxaana dooranaya xubnaha Guddiga ayadoo la raacaya shuruudaha hoos ku qoran:
   (a) Doorashada guddoonka Guddigu waa in ay ka tarjunta kala duwanaasha joqoraafiyadee iyo xaqsoorka muwaadiniinta dhexdooda sida uu qabo Qodobka 12-aad faqradiisa labaad ee Cahdiga KMG;
   (b) Waa inuu ahaadaa qof horey usoo qabtay xil Qaran ee hoggaamin bulsho;
   (c) Waa in uu haystaa shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay dhinaca sharciga;

## Qodobka 11-aad

*Shuruudaha xubinnnimada Guddiga*

(a) Waa inuu yahay muwaaddin Soomaaliyeed;

(b) Da'diisu ugu yaraan 35 sano;

(c) Inuu lee yahay aqoon heer jaamacadeed ah ama waaya'aragnimo uu ku muteystay texgelin bulshada dhexdeeda ama uu aqoon u lee yahay ugu yaraan mid ka mid ah qaybaha cilmiga ee hoos ku qoran: Shareecada, Fiqiga Islaamka, Qaynuunka, Xukun-dhaqameedka iyo Taariikhda Soomaalida, arrimaha maamulka dadweynaha, cilmiga dhaqaalaha, culuumta Siyaasadda iyo Maraynta Arrimaha Bulshada, maamulka dawladda iyo xiriirka Caalamiga;

(d) Waa inuu yahay qof urursan oo dhaqanwanaag iyo oo aan ku socon baaris dembiyo ciqaab loogu muteysanayo Qaynuunka Caalamiga iyo dembi xeerjebin ku ah Miithaaqyada Geneva ee 1949, ama arrimo dembi culus ku ah shuruucda Soomaaliyeed iyo inuusan ahayn qof ku xadgudbay go'aannada Golaha Ammaanka Qaramada Midooway oo lagu xusay warbixinta Kooxda Kuurgalka ama go'aannada Guddiga Cunnoqabataynta ee Qaramaha Midoobay.
(e) Waa inuusan ahayn xubin ka mid ah Baarlamaan, Xukuumad ama Shaqaale dawladeed midna

## Qodobka 12-aad

*Muddada xilka iyo xubinnimada Guddiga Dastuurka*

1. Guddiga Dastuurka wuxuu xilka haynaya ilaa iyo inta laga dhammeys tirayo Qoraalka Dastuurka ee kama Danbeysta ah gacantana laga saarayo Madaxweynaha, Ra'iisal

Wasaaraaha, iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka si waafaqsan Qoddobka 29 ee sharcigan lana jaanqaadaya Heshiiska Jabuuti.

## Qodobka 13-aad

*Xilwaayidda Xubnaha Guddiga*

(a) Geeri;
(b) istiqaalo Qoraal ah;
(c) Xil ka qaadis
(d) Xilgudasho la'aan joogto ah;
(e) Caafimaad xumo sababta inuu xilkiisa gudan waayo
(f) Ka maqnaasho saddax fadhi oo xiriir ah fadhiyada Guddiga sabab la'aan;
(g) Jebiyo Xeerka dhaqan shaqo wanaagga Guddiga;
(h) Xukun ciqaabeed dhaqangalay;

## Qodobka 14aad

*Agaasinka Guud Guddiga Dastuurka*

1. Guddida Dastuurka waxaa hawlihiisa ka kaalinaaya Agaasinka Guud ee Guddiga

2. Agaasimaha Guud iyo Ku-Xigeenada Agaasimaha Guud ee waxaa lagu magacaabayaa dikreeto Madaxweyne, ka dib marka Madaxweynuhu dhegeysto talada Golaha Wasiirada si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayadka ee Dawladda.

3. Agaasimaha Guud waxaa hawlaha xoghaynta ka kaalinaaya laba Ku-Xigeenno Agaasime Guud.

4. Ku xigeenadaAgaasimaha Guud midkood wuxuu mas'uul ka noqonaya:

   (a) Cilmibaarista, qoraalka, diiwaaneynta aftiqoraalada iyo ururinta iyo kaydinta dokumentiga iyo hawlaha Guddida Dastuurka iyo Guddi-hoosaadyadiisa;

   Ku-Xigeenka kalena wuxuu u xilsaaran yahay arrimaha

   (b) Xiriirka dadweynaha, xiriirka Guddiga Wacyigelinta, la-talinta iyo hawlaha xafiiska dibbediisa laga qabanayo oo ay ku jiraan la tashiyada dadweynaha.

5. Agaasimaha Guud iyo Ku-Xigeennadiisa inta aanay xilalka xafiisyadooda qaban waxay marayaan oo ayna saxiixayaan dhaarta ku xusan lifaaqa 2-aad, waxaana dhaarinaaya Guddoomiyaha ama xubin kale oo ka tirsan Maxkamadda Sare ayadoo Guddoomiyaha Guddida Dastuurkuna uu goobjoog ka yahay.

6. Guddida Dastuurku wuxuu shaqaaleysan karaa khubaro iyo la-taliyeyaal ka caawiya hawlihiisa, iyadoo la raacaya nidaamka Shaqaqorista dalka.

## Qodobka 15-aad

*Awoodaha Guddida Dastuurka*

1. Guddiga Dastuurku wuxuu yeelanaya dhammaan awoodaha u suurtogelinaaya xilgudasha iyo fulinta hawlaha loo xilsaaray.

2. Guddiga Dastuurku:

   (a) Wuxuu, carqalad la'aan heli karaa dhanbaalo/isgaarsiin, wuuxuu dalka Jumhuuriyadda ku qaban karaa shirar furan iyo kulamo gaar ah ama siyaabo kale ayuu ku ururin karaa aragtiyaha iyo aaraa'da muwaadiniinta Soomaaliyeed ee Jamhuuriyadda deggan ama dibeddiisa ku sugan;
3. Waxa uu u yeeran karaa qof kasta oo xil dawladeed haya inuu qof ahaan uu guddiga ama guddia hoosaadyadiisa u horyimaado ama usoo gudbiyo dokumenti, ama xogwarran ama waxyaalo kale oo loo arki karo inay khuseeyaan hawlaha Guddiga Dastuurka. Madaxweynuhu wuxuu u diri karaa Guddida Dastuurka qoraal ku saabsan Dastuurka.
4. Guddida Dastuurku wuxuu yeelanaya xeer hosaadkiis, kaoo aan khilaafeyn Axdiga iyo sharciga. .

## Qodobka 16-aad

*Guddi hoosaadyada Guddiga Dastuurka*

Guddida Dastuurku wuxuu isu qaybin kara guddiyo hawleedyo ka kooban xubnihiisa uu u arko inay lagama maarmaan u tahay gudashada hawlihiisa.

## Qodobka 17-aad

*Dhaarta Xafiiska*

1. Guddoomiyaha iyo Xubnaha kale ee Guddida inta aysan bilaabin xilgudashadooda waxay marayaan isla markaana saxiixayaan dhaarta xafiiska ee ku xusan lifaaqa 2-aad ee sharcigan, waxaana Magaca Allahu Swt ku dhaarinaaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama xubin kale oo ka tirsan Maxkamadda Sare, waxaana goob-joogayaal noqonaya Madaxda Sare, Wasiirka Wasaaradda Dastuurka iyo arrimaha Federaaliga iyo Guddoomiyaha Guddiga Baarlamaaniga ee Dastuurka.

2. Nuqullada Dhaarta xafiiska waxaa lagu kaydinaya xafiiska Agaasimaha Guud ee Guddida Dastuurka iyo Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare

## Qodobka 18-aad

*Guddiga Wacyigelinta*

1. Waxaa qodobkan lagu dhisay Guddiga Aqoonta/wacyigelinta, oo u xilsaaran:

   (a) Inuu dadweynaha u kordhiyo wacyigelinta la xiriirta la xiririira arrimaha Dastuurka

   (b) Inuu hormariyo wadahadalka dadweynaha kaga doodayo ujeedooyinka iyo mabaadii'da Dastuurka iyo fasiiraadda mawaadiicda iyo khiyaaradka la xiriira Dastuurka, kuwaasoo ay ka mid yihiin mabaadii'da aasaasiga ah ee lagu xusay Qoddobada 3 iyo 4; iyo
   guud ahaan inuu abaabulo fursado dadweynaha si ballaaran uga qaybgalo hawlaha.
2. Golahann wuxuu mas'uul ka yahay diyaarinta manhajka waxbarashada Wacyigelinta iyo agabka/qoraalka la raacayo, iyo isku dubaridka hawshan Wacyigelinta.

3. Guddigaan waa in lagu magcaabaa muddo saddex toddobaad gudahood ah marka Sharcigani hirgalo.

## Qodobka 19-aad

*Shuruudaha iyo Magcaabista Guddiga Wacyigelinta*

1. Guddigaan wuxuu ka koobnaanayaa sagaal xubnood oo leh aqoon waaya aragnimo dhinaca aqoon gudbinta, gaar ahaan waxbarista beelaha reer miyiga iyo dadka aan horey u helin waxbarashada agaasiman, ama aqoon u leh dastuurka, cilmiga siyaasadda, taariikhda Soomaaliya, iyo cilmiyada soo raaca;

2. Xubnaha Guddiga waa in aan midkoodna wax lug ah ku lahaan koox siyaasadeed;

3. Xubnaha Guddiga waa in ay ka mid noqdaan haween, koxaha laga tirada badan yahay iyo dhallin yaro;

4. Xubnaha Guddiga waxaa magcaabaya Ra'iisal Wasaaraha isagoo tixgelinaaya talada wasiirka.

5. Guddiga waa in uu hawlihiisa u fuliyaa si aan eexi ku jirin, isagoo aan dhinacna u janjeerin, waxaana xukumaya oo uu ku soconayaa Xeerka Dhaqanka Wanaagsan ee Shaqo hadba intii ka khuseysa.

## Qodobka 20-aad

*Xeerka Dhaqan Wanaagga Shaqo*

Guddiga Dastuurka, Guddiga Wacyigelinta, iyo agaasinka waxaa dhammaan ku waajib ah in ay ilaaliyaan Xeerka Dhaqan Wanaagga Shaqo ee lagu tilmaamay lifaaqa 3-aad si loo hubiyo in ay hawlahooda u gutaan si madax-bannaan, daacadnimo ku jirto, digtoon isla markaana eex ka fog.

## Qodobka 21-aad

*Maaliyadda iyo imkaaniyaadka kale ee Guddida Dastuurka iyo Guddiga Wacyigelinta*

1. Xukuumadda waxay si gaar ah isaga xilsaaraysaa sidii Guddida Dastuurka iyo Guddiga Wacyigelinta ay u heli lahaayeen miisaaniyadooda hawlfulineed.

2. Guddiga Dastuurka waa in uu usoo gudbiyaa warbixinno xisaabcelin ah sadaxbiloodba mar hay'adaha ku shaqada leh ee Xukuumadda;
3. Xukuumadda waa in ay hubisaa in la sameeyo hantidhoris dhinaca maaliyadda ee Guddiga Dastuurka iyo Guddiga wacigelinta

2. Guddida Dastuurku waa in ay u soo gudbisaa Guddida Maaliyadda ee baarlamaanka warbixinno xisaab celin ah saddexddii biloodba mar.
3. Xukuumadda waa in ay hubisaa in la sameeyo hanti dhawris dhinaca maaliyadda ee Guddida dastuurka iyo Golaha

## Qodobka 22-aad

*Mushaarooyinka iyo Gunnoyinka Guddida dastuurka, Agaasinka Guud iyo Guddiga Wacyigelinta*

Mushaarooyinka iyo gunnoyinka Guddida, Agaasinka Guud iyo Guddiga Wacyigelinta waxaa soo jeedinaya. Wasiirka iyadoo la raacaya nidaamka Dawladda

## Qodobka 23-aad

*Guddiga Marjiciga Hawlaha Dastuurka*

Waxaa qodobkan lagu dhisay Guddi Marjac Hawlaha Dastuurka.

Guddigaan wuxuu u xilsaaran yahay:

1. Inuu xalliyo wixii dhibaato ama is-afgarashawa ama khilaaf ra'yi ka dhaxdhasha hay'adaha u xilsaaran diyaarinta Qabyaqoraalka Dastuurka, iyo go'aan ka gaaridda arrimaha ku saabsan xeerjebinta hannaanwadaagga Guddiga.

2. Haddii duruufo gaar ah ay sababaan in Qabyoqoraalka aan lagu soo dhamaystiri karin waqtigii loogu talagalay, Guddigan wuxuu Xukuumadda kala talinaya madal dheereynta suurtagelin karta dhamaystiridda Qabyoqoraalka Dastuurka, oo aan marna ka badan karin sadax bilood.

3. Guddigaan wuxuu ka kooban yahay kow iyo toban, waxayna kala yihiin Guddoomiyaha, Guddoomiye ku-xigeenka iyo Xoghayaha Guddiga Baarlamaaniga arrimaha Dastuurka; shan xubin ka tirsan Golaha wasiirada uu ka mid yahay Wasiirka Wasaaradda Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka; iyo Guddoomiyaha iyo labada Guddoomiye ku-xigeen ee Guddiga Dastuurka.

4. Golaha arrimaha Dastuurka waa inuu ku dadaalo, intii suurtagal ahna u tooghayaa in go'aamadiisa iyo talooyinkiisaba ku gaaro wadar-oggol.

## QAYBTA AFARAAD
## Diyaarinta Qoraalka Dastuurka iyo Talo-Gelinta ee Dadaeynaha

### Qodobka 24-aad

*Adeegga Wacyigelinta*

1. Ka dib marka la magcaabo, Guddiga wacyigelinta waa in uu marka ugu horreysa ee suuragal ah uu kulan isugu yimaadaa si uu u qorsheeyo barnaamijka wacyigelinta oo soconaya muddada la diyaarinayo Qoraalka-Kama-Danbeysta ee Dastuurka oo dhan isagoo la tashanayo Guddiga Dastuurka.

2. Qorshaha waxaa Wasiirka loogu genayaa muddo laba toddobaad gudahood laga bilaabo markii Guddiga Waacyigelinta la magcaabo.

3. Laba bil gudahood, laga bilaabo maalinta uu sharcigan hirgalo, Goluhu waa in uu habeeyaa barnaamij Wacyigelin.

### Qodobka 25-aad

*Qorshaha Hawlgalka*

1. Guddiga Dastuurka markii la magacaabo ka dib wuxuu sida ugu dhakhasaha badan u yeelanayaa kulan uu ku dejinaayo kuna guddoonsanaayo Qorshoha Hawlgalka. Qorshahaa waa inay ka mid yihiin:

(a) Hawlo xubnaha guddida lagu barayo waaya aragnimada isbarbardhigga ee dastuur sameynta, iyo afkaarta dastuurada ee lagama maarmaanka u ah qoritaanka dastuurka;

(b) Barnaamajka wargelinta dadweynaha lagula socodsinayo geeddisocodka iyo arrimaha la xiriira Dastuurka;

(c) Jadwal gooreysan oo la xiriira diyaarinta Qoraalka Dastuurka iyo Talo-Gelinta Dadweynaha;

(d) Qorshe loogu talo galay faafinta Qoraalka Dastuurka iyo Talo-gelinta ah ee Dadweynaha;

(e) Qorshe loogu tala galay la tashiga dadweynaha ee la xiriira Qoraalka iyo Talo-Gelinta ee Dastuurka;

(f) Qorshe loogu tala galay lafa gurka aragtiyada iyo fiirooyinka laga dhiibtay Hindisaha Qoraalka kama Danbeysta ah; iyo

(g) Qorista iyo faafinta Qoraalka kama Danbeysta ah.

2. Isla Qorshahaas waa in lagu daraa qiyaas la xiriirta maaliyadda iyo imkaaniyaadka kale loo baahan yahay in Guddigu Qorshehiisa ku fuliso.

3. Qorshaha waa in Wasiirka loogu gudbiyaa saddex toddobaad gudahood laga bilaabo kulanka koowaad ee Guddiga Dastuurka.

**Qodobka 26-aad**

*La-tashiga Dadweynaha*

1. Guddiga Dastuurka, oo la tashaday Guddiga Wacyigelinta, wuxuu diyaarinaya Warqadda La-tashiga Dadweynaha, oo ay ku qeexan yihiin geeddisocodka lagu samaynayo Dastuurka iyo cayimidda arrimaha dastuuriga ah ee ku waajihan Soomaaliya iyo kala doorashada habka dastuuriga ah ee dalka u habboon.

2. Warqadda waa in si baahsan loo faafiya, Guddiga wacyigelintana waa inuu nuxurkeeda si tifatiran dadweynaha ugu fasira.

3. Warqadda la-tashiga waa in la qaybiyaa laba bil gudahood laga bilaabo maalinta Guddiga Dastuurka la magacaabay.

4. Guddiga Dastuurka wuxuu warqadda la- tashiga dadweynaha ku codsanaya in loo soo gudbiyo talooyinka iyo faallooyinka lagu qoraayo Dastuurka.

5. Qof shakhsi ah iyo urraradba waxay xaq u lee yihiin inay Guddiga Dastuurka usoo gudbiyaan soo-jeedimahooda ay la tahay in lagu qoro Dastuurka.

**Qodobka 27-aad**

*Diyaarinta iyo faafinta Soojeedinta Qabyoqoraalka Dastuurka*

1. Guddiga Dastuurka, ka dib markii uu cilmibaaristiisa ka baaraandego, kala hufidda talooyinka iyo fiirooyinka dadweynaha usoo soo gudbiyey iyo go'aamadiisaba ka bogto, wuxuu diyaarinaya Qabyoqoraalka Dastuurka oo Soojeedin ah. Wuxuu kaloo diyaarinaya xogwarran uu ku fasiraayo habraaca lagu soo diyaariyey, iyo warbixin uu kusoo koobayo talooyinka iyo fiirooyinka dadweynaha soo jeediyey iyo garwaaqsiga ka dambeeya soojeedimaha Qabyaqoraalka lagu soo bandhigay.

2. Warbixinta iyo Qabyoqoraalka waa in si ballaaran loo qaybiyaa, ayadoo Guddiga Wacyigelinta lala kaashanayona waa in nuxurkiisa si faahfaahsan loogu fasiraa dadweynaha.

3. Qaybinta Soojeedinta Qabyoqoraalka Dastuurka waa inaysan ka dambayn markay shan bilood kasoo wareegto magacaabidda Guddiga Dastuurka.

## Qodobka 28-aad

*Qabyoqoraalka Soojeedinta ah lagala tashanaayo dadweynaha*

1. Qaybinta koowaad ee warbixinta iyo Qabyoqoraalka Soojeedinta Dastuurka ka bid, waxaa dadweynaha fursad loo siinaya laba bilood ay kaga faalloodaan Soojeedinta Qabyoqoraalka Dastuurka oo ay talooyinna kusoo jeediyaan.

2. Guddiga Dastuurka oo kaashanaaya Guddiga Wacyigelinta, wuxuu xaqiijinaya in dadweynaha la siiyo fursado ay kaga baaraandagaan Soojeedinta Qabyoqoraalka oo ay aragtidooda iyo talooyinkoodana ugu soo gudbiyaan Guddiga Dastuurka.

## Qodobka 29-aad

*Diyaarinta iyo faafinta Qayoqoraalka Dastuurka*

1. Guddiga Dastuurka waa inuu kala hufidda fiirooyinka iyo talooyinka dadweynaha kasoo jeediyey Soojeedinta Qayoqoraalka Dastuurka ku dhamaystira Afar toddobaad gudahood, laga bilaabo dhammaadka muddada la-tashiga dadweynaha ku xusan Qodobka 27-aad.

2. Ayadoo laga ambaqaadayo fiirooyinka iyo taloyinka kasoo xaasil noqday kala hufidda, Guddiga Dastuurka waa inuu laba toddobaad kale gudahood ku dhamaystiro, kuna soo bandhigo kuna qaybiya Qabyoqoraalka Dasturka.

3. Qabyoqoraalka Dastuurka waxaa loo gudbinaya Madaxweynaha, Wasiirka iyo Afhayeenka Baarlamaanka oo u xilsaaran inuu u qaybiyo xubnaha Baarlamaanka. Wasiika waa inuu hubiyaa in Qayaqoraalka Dastuurka si baasan loo gaarsiyo dadweynaha, si fududna u haleeli karaan.

## Qodobka 30-aad

*Nidaamka go’aanqaadashada Guddiga*

1. Soojeedimaha La-Tashiga Qabyoqoraalka Dastuurka oo Dadweynaha loo gudbinaayo wuxuu Guddiga Dastuurka ku guddoonsanaya wadar-oggolka xubnaha Guddiga *(ijmaac)*.

2. Haddii xubnaha Guddiga Dastuurka dhexdooda ay kasoo ifbaxaan khilaafaad afkaar kala fog iyo wixii laaysku afgaranwaayo, Guddiga wuxuu ugu wadaxajoonaya kuna xallinaya isagoo raaca soojireenka iyo xeer-dhaqameedka Soomaalida.

3. Guddiga Dastuurka wuxuu ku dadaalaya marwalbana u tooghaynaya in soojeedin walba oo lagu qoraayo Qabyoqoraalka Dastuurka ku ansixiyo wadar’oggolka xubnaha Guddiga oo dhan *(ijmaac),* soojeedintii wadar oggol loo waayo, Guddiga waa inuu u codeeya, wuxuuna ku ansixinaya israaca sadax meelood labo xubnaha Guddiga.

## Qodobka 31-aad

*Muddeynta Soo afjaridda Geeddisocodka*

Hawlaha Geeddisocodka lagu diyaarinaayo Qabyoqoraalka Dastuurka waa inay kusoo dhamaystirmaan laguna faafiya ugu dambayn 30ka Diseembar 2010, sida ku cayiman Jedwelka 1-aad, laga bilaabo ka dib markuu Baarlamaanka sharcigan ansixiyo Madaxweynahana kusoo saaro Xeer Madaxweyne.

## Qodobka 32-aad

*Toosin Sharci Lambar TEP/1/193/06* ee *10-ka Juun 2006*

1. WaxaaToosin Sharci iyo wax ku kordhin lagu sameeyey sharciga Nambarkiisu yahay TFP/1/193/06 ee 10-ka Juun 2006 lagu dhisay Guddiga Madaxbannaan ee Dastuurka Federaaliga si loo waafajiyo hannanka diyaarinta Qabyoqoraalka Dastuurka iyo isbeddelka uu keenay heshiiskii Djibuoti iyo isbedelka guud ee duruufaha dalka.

2. Dhammaan go'aamada hore loogu gaaray si waafaqsan sharciga la bureyey waxay sii ahaanayaan go'aanno ku dhaqmidmidoodu ansax ah.

## Jedwelka I
## *Muddeynta Geeddisocodka*

Go'aansiga waqtiyeenta geeddisocodka waxaa looga gol lee yahay in dadweynaha loo xaqiijiyo si buuxda uga qaybqaadashada geeddisocodka lagu diyaarinaayo Qabyoqoraalka Dastuurka iyo in Qabyoqoraalka Dastuurka kusoo dhamaystirmo Febraayo 2011. Jedwelkan wuxuu kala qeexaya hadba hawlaha la qabanayo iyo horumarka ay tahay in hawl walba lagu gaaro dhammaadka muddada loo qabtay, ayadoo la waafajinaayo makii meel marinta sharcigan la ansixiyo. Dhammaan hay'adaha u xilsaaran diyaarinta Qabyoqoraalka Dastuuka waa inay u hoggaansamaan muddeyntan.

### *1. Bisha koowaad*

1A Magacaabidda iyo dhaarinta xubnaha Guddiga Dastuurka waa inay ku dhamaystirantaa laba toddobaad gudahood, laga bilaabo taariikhda sharcigan hirgalay;

1B Kulanka koowaad ee Guddiga Dastuurka waa in haddiba la qabta dhaarinta xubnaha ka dib;

1C Magacaabidda Xoghayaha Guud iyo ku-Xigeenada Xoghayaha Guud laba toddobaad gudahood, laga bilaabo taariikhda la qabtay kulanka koowaad ee Guddiga;

1D In Qorshaha howlgalka Guddiga lasoo bandhigo markii sadax toddobaad ay kasoo wareegto kulanka koobaad uu Guddiga yeeshay;

1E Golaha Waxbarashada Madaniga waa in lagu magacaabaa sadax todobaad gudahood, laga bilaabo taariikhda Sharcigan hirgalay;

1F Barnaamajka Waxbarashada Madaniga lagu wacyigelinaayo dadweynaha, waa in lagu soo bandhigaa laba toddobaad gudahooda, laga bilaabo taariikhda magacaabidda Golaha Madaniga;

## *2. Bisha Labaad*

2A Qabyotiridda iy dhamaystiridda arrimaha ku xusan 1D - haddii loo baahdo;

2B Qabyotiridda iy dhamaystiridda arrimaha ku xusan 1F - haddii loo baahdo;

2C Dardargelinta Barnaamajka Waxbarashada Madaniga, uga yaraan lix toddobaad markay kasoo wareegto Magacaabidda Golaha Madaniga (barnaamijka wacyigelinta madaniga waa soconaya ilaa Qabyoqoraalka Dastuurku dhamaystirmo);

## *3. Bisha sadaxaad*

3A Golaha Madaniga waa inuu sii wadaa Barnaamjla Barashada Madaniga;

3B Ka wadatashiga hawlaha dastuurka iyo guddoonsiga arrimaha dastureed ee Guddiga Dastuurka waa inuu socdaa;

## *4. Bisha afaraad*

4A Golaha Madaniga waa inuu sii wadaa Barnaamjla Barashada Madaniga;

4B Ka wadatashiga hawlaha dastuurka iyo guddoonsiga arrimaha dastureed ee Guddiga Dastuurka waa inuu socdaa;

## *5. Bisha shanaad*

5A Toddobaadka kowaad ee bisha, guddiga waa inuu soo bandhigaa warqadda la-tashiga dadweynaha oo ku qeexan arrimaha lagala tashanayo;

5B Golaha Madaniga waa inuu faafiyaa oo qaybiyaa warqadda la-tashiga dadweynaha;

5C Ka wadatashiga hawlaha dastuurka iyo guddoonsiga arrimaha dastureed ee Guddiga Dastuurka waa inuu socdaa, wuxuuna sii wadaya howlaha warqadda wadatashiga;

5D Soo ururidda warcelimaha wada tashiga

### *6. Bisha lixaad*

6A  Faafinta warqadaha latashiga dadweynaha

6B  Soo ururidda warcelimaha wada tashiga;

### *7. Bisha Toddobaad*

7A  Guddiga waa inuu soo bandhigaa Qabyoqoraalka Dastuurka lagala tashanaayo dadweynaha

7B  Guddiga Dastuurka iyo Golaha Madaniga waxay faafinayaan oo qaybinayaan Qabyoqoraalka Dastuurka lagala tashanaayo dadweynaha;

7C  Soo ururidda warcelimaha wada tashiga

### *8. Bisha Sideedaad*

8A  Faafinta iyo qaybinta Qabyoqoraalka Dastuurka lagala tashanaayo dadweynaha waa inay sii socotaa

8B  Soo ururidda warcelimaha wada tashiga waa inay sii socotaa;

### *9. Bisha sagaalaad*

9A  Faafinta iyo qaybinta Qabyoqoraalka Dastuurka lagala tashanaayo dadweynaha waa inay sii socotaa;

9B  Soo ururidda warcelimaha wada tashiga waa inay sii socotaa;

### *10. Bisha tobanaad*

10A  Ka baaraandegidda iyo kala hufidda talooyinka dadweynaha;

10B  Dib-u-eegidda Qabyoqoraalka Dastuurka oo lagu dhafayo talooyinka lagu soo xigtay geeddisocodka;

### *11. Bisha kow iyo tobanaad*

11A  Dib-u-eegidda Qabyoqoraalka Dastuurka oo lagu dhafayo talooyinka lagu soo xigtay geeddisocodka;

11B Bandhigidda iyo faafnta Qabyoqoraalka Dastuurka kama dambeska ah oo lagu dhafay talooyinka dadweynaha;

### *12. Bisha laba iyo tobnaad*

12A Faafinta Qabyoqoraalka Dastuurka

## Jedwalka 2-aad

### *Dhaarta xubnaha Guddiga Dastuurka, Xogahaya Guud iyo Ku-xigeennada Xogahaya Guud*

Aniga oo magaceygu yahay [*halkan haku sheego magac qofka oo saddaxan*], oo la ii magacaabay [*halkanna haku sheeg xilka loo magacaabay*], waxaan Magaca Allahu Subxaanahu wa Tacaalaa ku maraya inaan xilkeyga si Lillaahi iyo eex la'aan ah u guto, hawlaha la ii xilqaamayna u fuliyo sida ugu habboon oo u dan u ah Dadweynaha Jumhuuriyadda.

## Jedwalka 3-aad

### *Xeerka Hannaanwanaagga xubnaha Guddiga Dastuurka iyo Shaqaalaha Guddiga*

1. Xubin Guddiga ka mid ah uma bannaana:

   (a) Inuu xubinnimadiisa u adeegsado ama ku hadlo ama ka qaybgalo oraahyo ama falal carqaladayn kara madaxbannaanida xubnaha Guddiga ama wax walba oo waxyeleen kara kalsoonida la siiyey Guddiga ama ama iin u keeni kara dhanjirid la'aanta iyo madaxbannaanida iyo sharafta Guddiga.

   (b) Inuu si gaar ahaaneed oo shakhsi ah u isticmaalo ama uga faa'ideysto xog kasta oo uu ku ogaaday ka mid ahaanshaha xubinnimada Guddiga.

   (c) Haddii xubin ka mid ah Guddiga uu si toos ah ama si dadban uu u danaynaayo qandaraas ama soo jeedin qandaraas oo Guddiga go'aamin u horyaal, xubinkaas waa inuu Guddiga ku wargeliyaa, waana inuusan ka qaybgelin ka hadalka, qaddarinta iyo u codeynta qandaraaska iyo arrin kasta oo ku saabsan qandaraaskan, intii arrikan laga hadlayana laguma xisaabinaayo quorumka.

2. Xeerkan oo waxa ka bedelid iyo ku kordhin lagu sameeyey ayaa shaqaalahana loogu dhaqi doona.